

U shaqaynta Shirkadda Samhall

Haddii itaaldarro awgeed ay hooseeyso kartida shaqaysashada, oona xaaladaada lagu qiimeeyo inaad shaqo ku heli karin iyadoo la adeegsanaayo waxkaqabadyo kale, waxaad u shaqayn kartaa Shirkadda Samhall. Waa shaqo hadba xaaladaada aad qaban karto, wax ku baran karto horumarna ku gaari karto hadba kartidaada. Waxaad mar kasta ka tirsanaan doontaa koox- shaqaale oo wadajir u shaqaysan doontaan hab xilkasnimo ku salaysan. Shaqo ku qorida waa in goor dambe ku suurtagelisaa inaad shaqo ka hesho suuqa shaqada ee caadiga ah.

Ma heli karaa u shaqaynta Shirkadda Samhall?

Waad heli kartaa u shaqaynta Shirkadda Samhall haddii kartida shaqaysashada hooseeyso itaaldarro awgeed, una baahan tihid shaqo gaar ahaan ku habboon xaaladaada. Teeda kale, waa in

- aad Xarunta Shaqada isku qortid shaqo-doone ahaan
- ay kartida shaqaysashada hooseeyso ilaa heer, oona shaqo kale heli karin ama shaqo ku heli karin iyadoo la adeegsanaayo waxkaqabadyo kale.

Immisa ayaa gunno ahaan lay siinayaa?

Waxaad xaq ku leedahay mushahar iyo faa'iidooyinka shaqada kale, oo waafaqsan mushaharada ku salaysan heshiiska is-kaashatada ee laanta ganacsiga.

Ma tijaabin karaa in aan u shaqeeyo loo shaqeeyaha kale?

Waxaad had iyo jeer haysata fursad aad ku tijaabiso u shaqaynta loo shaqeeyaha kale markii aad u shaqaynayso Shirkadda Samhall. Sannad gudahiisa ayaa Shirkadda Samhall dib ugu soo noqon kartaa haddii aad ka qoomamayso.

Markii aad u diyaargarowdo inaad shaqo suuqa shaqada ka raadsato, waxaad naga heli kartaa tababar iyo waxbarasho.

Sidee xilka loo qaybsaday?

Haddii aad doonayso warbixin xiriir la leh u shaqaynta Shirkadda Samhall, fadlan la xiriir Xarunta Shaqada. Gacanhaayaha arrimaha shaqada wuxuu markaas kaddib ku dhaqaaqayaa in uu qiimeeyo haddii ay surtagal tahay inaad shirkadaas shaqo ka hesho. Shaqo ku qorida ka hor waxaad adiga iyo gacanhaayaha arrimaha shaqada booqan doontaa Shirkadda Samhall, taasoo ujadadeeda ah aqoon-korsashada ku saabsan u shaqaynta Shirkadda Samhall.

Ka hor intii aadan shaqada Shirkadda Samhall ka bilaabin, waxaa heshiis isla gelaayo adiga, Xarunta Shaqada, loo shaqeeyaha iyo ururrada shaqaalaha. Qoraalka heshiiska waa lagu xusa qorsheha ujeedada shaqaalaynta. Qoraalka heshiiska waa in lagu qora hawlaha qofka la shaqalayn doono uu qaban doono, sida aad u horumari doonto iyo taageerada goobta shaqada aad ugu baahan tahay.

Adiga iyo hoorjoogaha shaqaalaha adiga ku gaarka ah ee Shirkadda Samhall, waxaad wadajir ku dhaqaaqi doontaan tixraacid shaqaalaynta oo joogto ah, waxaana lagu saamayn doonaa qorshe horumarid ku gaar ah. Qorsheha horumarida waxaad ku tixraaco doontaan idinkoo hab joogto ah u yeesho wada-hadalka qorsheynta.

Nidaamyada

Xeer-maamuleedka (2000:630) ku saabsan waxkaqabadyo gaar loogu talagalay dadyoowga qaba itaaldarro, taasoo sababta hoos u dhaca kartida shaqaysashada, gaar ahaan § 32, 33 iyo 34.

Nagala soo xiriir 0771-416 416 haddii arrintaan aad xiisaynayso ama aad doonayso warbixin dheeraad ah. Waxaad kaloo booqan kartaa Xarunta Shaqada kugu dhow ama shabakadda internetka arbetsformedlingen.se.